

10 Talooyin oo ah Badbaadada Dooni Kaxaysiga

Marka la isku celceliyo, 140 qof oo reer Kanada ah ayaa ku geeriyooda qisooyinka ka dhaca kaxaysiga doonida sannad kasta. Boqolkiiba 80 in ka badan ayaa ah rag. Boqolkiiba 90 in ka badan ayaan gashan jaakeetyada nolol-badbaadiska ah. Markaad waddada ku jirto, waxaad xidhataa suunka baabuurka sababta oo ah waxaad ogtahay inaad waqti u heli doonin gashatdka suunka markuu shilku dhacayo . Markaad biyaha dul joogto, sidaas oo kale uga fikir jaakeetkaaga nolol-badbaadiska ah. Kuuma shaqayn doonto haddii aadan xiran jaakeetkaaga.

Talooyinka ugu muhiimsan ee badbaadada dooni kaxaysiga:

1. Sida loo maleeyo iyada oo ka duwan, ayuu biyuhu qabowga ahi yahay dilaa ka daran wax kasta. U diyaar-garow argagaxa biyaha qabow u leeyahay –had iyo jeer gasho jaakeetka nolol-badbaadiska ah.
2. Khamriga iyo dooni kaxaysiga la iskuma daro. Kaga tag khamriga xeebta.
3. Saadaalinta hawada iska hubi. Xeebta isla markaaba ku soo noqo haddii cimil-maalmeed xun ay kugu soo food-yeelato.
4. U-hoggaansanow dhammaan calaamadaha digniinta iyo sabbeeyayaasha rugaha korantada ku wareegsan iyo biyo xireennada, biyuhu wuxuu isku beddeli karaa waqti il-biriqsiyo ah iyada oo biyodegga oo aragti qurux badan uu isku beddeli karo biyo kacsan oo dilaa ah. “Ka Fogow, oo Badbaad”.
5. Si xil-kasnimo leh u wad sixiimadaha-xoogga u socda (powerboats) – isticmaal xawaaraha ku habboon gaar ahaan markay biyuhu jarjaran yihiin (ayna sinnayn).
6. Kursiga ku fadhi! Si dhib yar ayaad uga dhici kartaa sixiimadda-xoogga, huuriga, ama “kayak”-ga.
7. Diyaar ahow. Hubi in doonidaadu dusheeda ku wadato qalabka badbaadada iyo shidaal ku filan.
8. Qaado raadiyaha VHF ama taleefanka gacanta markaad biyaha dushooda joogto.
9. Had iyo jeer u sheeg qof meesha aad tageyso iyo goorta aad soo noqoneyso.
10. Tababbar qaado. Baro sida looga badbaado si lama filaan ah markaad ugu dhacdo biyaha.

Talooyinka badbaadada dooni kaxaysiga waxa kuu soo gudbiyey Bulshada badbaadiska Noloshaha Iyo Quwad Soo-Saarka Ontario (Lifesaving Society and Ontario Power Generation). Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah waxaad tagtaa www.lifesavingsociety.com.